



Dhaqtar. Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijon DaCosta, Sr., *Guddoonka Guddiga*
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
 Marwo Anna Hill
 Marwo Whitney McGinniss
 Marwo Allyson Gevertz
 Marwo Vickie B. Turner
 Dhaqtar Joyce Morley

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Diseembar 5, 2024

Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
 Carla Parker 404-734-1717

Shan ka mid ah Dugsiyada Gobolka DeKalb ayaa lagu Sharfay *Abaalmarinta Guusha Kulliyada Qaranka*

(STONE MOUNTAIN, GA)—Shan dugsiyada ku yaalo Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) ayaa kasbaday [Abaalmarinta Guusha Kulliyada](#) sharafeysan ee 2024, iyadoo la aqoonsanayo dadaaladooda aan caadiga aheyn ee u diyaarinta ardayda kulliyada. Abaalmarintaan, waxaa bixiyay ururka aan faa'ido doonka aheyn [GreatSchools](#), oo aqoonsado dugsiyada sare ee dadweynaha ee ku fiican ku caawinta ardayda ka diiwaangelinta kulliyada oo ku guuleysto dadaaladooda waxbarashada sare.

Shanta Dugsiyada DCSD ee helayo maamuuskaan qaranka ayaa ah:

- [Dugsiga Sare Arabia Mountain](#)
- [Machadka Kulliyada DeKalb Early \(DECA\)](#)
- [Dugsiga Farshaxanka ee DeKalb \(DSA\)](#)
- [Dugsiga Sare Southwest DeKalb](#)
- [Dugsiga Sare Tucker](#)

“Waxaan ugu hambalyeynayaa dugsiyadaan aan caadiga aheyn aqoonsigaan ay sida fiican ugu qalmaan,” waxaa yiri Kormeeraha guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton. “Sida aad arki kartid, dugsiyadeena waxay sameeyaan wax ka badan barida. Guud ahaan Degmadeena, waxaa naga go’an inaan hagno oo aan ku taageerno ardaydeena guusha waxbarashadooda dugsiya sare kadib iyo yoolalka shaqo.”

[Abaalmarintaan Guusha Kulliyada](#) waxay aqoonsantahay dugsiyada sida waxtarka leh u caawiyo ardayda inay kormeeraan nidaamka diiwaangelinta kulliyada oo ku dhiirogeliyo waxbarashooda joogtada ah, gaar ahaan kuwa ka socdo asalka daqliga hoose. Shantaan dugsiyada DCSD waxay ka mid yihiin koox sare oo ka kooban 104 dugsiyada dadweynaha ee ku yaalo Georgia inay helaan abaalmarintaan.

Tan ayaa ka dhigan in lix jeer oo labadaba ah [Dugsiga sare ee Arabia Mountain](#) iyo [Dugsiga Farshaxanka DeKalb](#) ayaa kasbaday [Abaalmarinta Guusha Kulliyada](#).

[GreatSchools](#) ayaa ah ururka aan faa'ido doonka aheyn ee hogaamiyo ee siiya qoysaska illo qiimo leh oo ka caawiyo inay ku helaan waxbarasho tayo sare leh. Waa cabirada Qiimeynta U diyaar garowga Kulliyada sida fiican ee dugsiyada sare ugu qalabeeyaan ardayda kulliyada iyo shaqooyinka, markii la barbardhigo duGsiyada kale ee gobolkoo dhan. Qiimeynta waxay tixgelisaa arimaha sida heerarka qalin jabinta, waxqabadka imtixaanka gelitaanka kulliyada (SAT/ACT), iyo ka qeybqaadashada koorsooyinka hormarsan sida Shahaadada Caalamiga ah (IB), diiwaangelinta labada ah, iyo Meeleynta Hormarsan (AP), oo ay wehliyaan heerarka gudbida imtixaanka AP.